

Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa

# Ka Timid Silic Ku Wacdiye

Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Janie Forest
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2023 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.



Ilaah waxyaalo waaweyn buu ka dhex sameeyey dadkiisi ka tirsanaa Kaniisaddii hore. Nin ka mid ah dadkii, oo la odhan jiray Filibos, ayaa ku mashquulsanaa dad badan oo isu soo ururuay inuu u sheego waxyaalo ku saabsan Ciise. Laakiin Ilaah wuxuu u diray saxarihii lamadegaanak ahaa. Sababtu maxay tahay?



Ilaah baa ogaa inay joogaan safari saxaraha lamadegaanka, wuxuu ahaa Wasiir amar weyn ka hoos hayay boqoraddii Kandake ee Xabashida. Wuxuun aku jiray waddadii uu dib ugu sii noqonayay wadankiisii oo wuxuu akhrisanayay kitaab gaar ah. Ma garanaysaa waxaad akhrineysid?



Markii
Filibos
adeecay
Ilaah,
Ilaah baa ku
hoggaamiyey
isaga wasiirkii oo
akhrinaya Ereyyga Ilaah
isagoon garanaynin ama fahmaynin.
Wuxuu ku soo dhaweeyey
Filibos meeshii uu saarnaa.


“Waa maxay waxan micnihiisa?” wasiirkii baa Filibos weyddiiyey, Intii ay saarnaayeeen gaahifardoodkii waddadii saxara dhexdeeda, Filobos baa afkiisa furay oo bilaabay inuu wax ka sheego Qorniinka, kuna wacdiyey Ciise isagii.





Wasiirkii Afrikaanka
ahaa markiiba wuu rumeystay
farriintii Kitaabka Qudduuska, in
Ciise MAsiix yahay Wiilka Ilaah.
Biyo ayuu arkay, oo wuxuu yidhi,
“Maxaa iga celinaya in la i babtiiso?”

Filibos baa yidhi, “Haddaad qalbigaaga oo dhan ka rumeysatid, waa suurtowdaa.” Wuuna u jawaabay oo yidhi, “Waxaan rumeysanahay in Ciise Masiix yahay Wiilka Ilaah,”
Filbos biyihii buu geeyey oo wuu babtiisay isagii.





Imanka markii ay ka soo baxeen biyihii, Ruuxa Rabbiga ayaa dhuftay Filibosmar dambana ma arkin ninkii Afrikaanka ahaa.  Jidkiisii ayuu iska qaaday isaga oo faraxsan!

Laakiin dadka qaar wey necbaayeen Masiixiyiinta. Stefanos, midkaloo Filibos saaxiibkii ahaa, ayaa waxaa dilay dad caraysan oo aan doonaynin in lagala hadlo waxyaabaha ku saabsan Ciise. Ninka la yiraahdo Sawlos oo ahaa reer Tarsas ayaa wax kaa caawiyey dililddii Stefanos. Sawlos wuu nebcanaan jiray Masiixiyiinta oo idil.



Sawlso, wuxuu ku dhaartay oo cabsiiyey inuu dili doono Masiixiyiinta, wuxuu u tagay wadaadkii sare oo weyddiistay inuu warqad siiyo si uu u soo xidhxidho rag iyo dumarba wixiii Masiixa raaacsan.






Miskiin Sawloskii Tarsos! Ma uusan in markii la wax la yeelo dadka Ilaah, inuu run ahaantii – xaqiiqdii uu waxyeelayo Rabbi Ciise Masiix qudhiisa. Ilaah waa inii ka joojiyaa Sawlos. Laakiin sidee dee?

Ilaah baa “xidhay” intuu waddada ku sii jiray waddada caasimadda Dimishiq, Ilaah wuxuu ku ifiyey iftiin smada ka yimid. Markaasuu dhulka ku dhacay. Deedna wuxuu maqlay cod.





“Yaa tahay Sayidow?” Sawlos baa sidaa ku qayliyey. “Waxaan ahay Ciisha aad silcineysid.” Wuu cabsaday oo gariiray, wuxuuna weyddiistay Sawlos, “Sayidow maxaan sameeyaa?” Rabbigana wuxuu ku yidhi isagii, “Kac oo magaalada gal, oo waxaa laguu sheeegi doonaa wixii kugu waajib ah inaad samaysid.”

Nimankii la socdaalayayna wey maqleen codkii, laakiin ninna ma aynan arkin. Sawlos markaasuu dhulk aka kacay - oo wuxuu ogaaday inuu waxba arkayn oo uu indha belay! Markaasay gacantaq kau hageen oo keeneen Dimishaq.



Magaaladii, Sawlos saddex maalmood ayuu arag la'aan joogay oo waxba cunin cabinna.  Laga yaabee inuu wakhti siiyey inuu Rabbi Ciise Masiix baryo.
Kii uu kula kulmay jidkii Dimishaq.



Ilaah wax walba wuu u qorsheeyey. Dimishaq dhexdeeda waxaa joogay xerow la odhan jiray Ananiyas. Rabbiga ayaa u diray inuu caawiyo Sawlos. Ananiyas wuu cabsaday. Laakiin wuu addeecay Ilaah. Maerkii uu gacmaha saaray Sawlos dushiisa, indhihii way u furmen – Sawlosna waxaa ka buuxsamay Ruuxa Qudduuska ee Ilaah.



Sawlos waa la babtiisay. Deedna waxbuu cunay. Oo markii uu helay cuntadii, wuu xoogeystay oo tamartii baa u soo noqotay. Sawlos xoog buu u baahnaa. Wuxuu haystay wax aad muhiin u ah inuu sameeyo.



Durbadiiba Sawlos Masiixa buu ku wacdiyey macbudkii Yuhuudda, inuu yahay Wiilka Ilaah. Dabadeedna dadkii maqlay oo idil way la yaabeen, oo waxay yidhaahdeen, "Kanu sow ma aha kii Masiixiyiinta layn jiray?" oo qaar baa ku tashtay inay dilaan Sawlos.





Sawlos waa ogaaaday cadowyadiisii inay taagan yihiin irdaha magaalada oo ay doonayaan inay Sawlos dilaan haddii uu isku dayo inuu ka tago magaalada. Laakiin saaxiibadiisii cusbaa ee Masiixiyiinta ahaa ayaa qaaday oo habeen derbiga ka sii daysay iyaga oo dembiil ku dejinaya.



Oo wixii intaa ka bilowday, Sawlos silciyihii Masiixiyiinta wuxuu la mid noqday rumayste la jira Sayidkii cusub, Ciise Masiix.

# Ka Timid Silic Ku Wacdiye

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Falimaha Rasuullada 8-9

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130

Dhammaad

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16